

# Asylum Support Partnership

## help and advice



March 2009

Somali

## Go'aan aqbalaad ah oo ah codsigaaga magangalayo

Marka Hay'adda Xuduudka ee Boqortooyada Midowday (UK Border Agency - UKBA) go'aan ka gaadho codsigaaga magangalyo ee ku siiso oggalaansho joogitaan, waxa lagu siin doonaa mid ka mida ah kuwan soo socda:

- Oggalaansho qaxooti (Refugee status)
- Oggalaansho badbaadin bini'aadan (Humanitarian protection)
- Oggalaansho ku-meel-gaadhsiis ah (Discretionary leave)

Marka lagu siiyo mid ka mid ah oggalaanshayaasha kor ku yaala macnaheedu ma aha in loogu oggalaaday inaad si joogto ah u deganaatid Boqortooyada Midowda (UK). Waxa kaliya ee aad si joogto ah wadanka u joogi kartaa marka UKBA ku siiso oggalaansho joogitaan oo aan xad lahayn (indefinite leave to remain), oo sidoo kale loo yaqaano 'dejin' (settlement).

### Ma lagu siiyay oggalaansho qaxooti?

Haddii lagu siiyay oggalaansho qaxooti macnaheedu waxa weeye waxa lagu ictiraafay inaad tahay qaxooti marka la eego macnaha Heshiiska Qaxootiga (Refugee Convention) ee 1951.

Marka UKBA ku siiso oggalaansho qaxooti, waxay ku siinaysaa oggalaansho joogitaan oo ah shan sannadood. Marka mudadaasi kaa dhamaato ee aad weydiisatid ama ka codsatid kordhin, waa in UKBA kuu oggalaato inaad Boqortooyada Midowday (UK) u joogtid si aan xad lahayn ama joogto ah iyada oo shuruudduhu yihiin intii lagu jiray shantaa sannadood sidan soo socota:

- Xaaladaha wadankaagii hooyo si macno leh uma soo fiicnaan;
- Waxa aad lug ku yeelatay ama ku kacday fallal ka soo horjeedo qodobada Heshiiska Qaxootiga iyo
- Waa inaad ku gudubtid ama ku guulaysatid Imtixaanka Nollosha UK (Life in the UK Test) kaasoo ah imtixaan ku saabsan aqoonta luqadda iyo nollosha UK ama aad qaadatid fasallo ama waxbarasho isugu jirta Barashada Ingiriisiga Luqad Labaad Ahaan (English as a Second Language) iyo muwaadinnimo.

Waxa si weyn muhiim u ah inaad codsatid in lagu kordhiyo oggalaanshahaaga joogitaanka ee shan sannaadood ka hor inta aanuu kaa dhicin. Haddii aad codsatid kordhin ka dib marka oggalaanshahaaga hadda ka kaa dhaco, waxa dhacaysa in UKBA ay ku dhaqaaqdo dib-u-fiirin qoto dheer oo lagu sameeyo oggalaanshahaaga qaxooti. Waxa kale oo laga yaabaa in codsi kordhin oo aad sameysatid ka dib marka oggalaanshuhu kaa dhaco ay saameyn ku yeelato xaqaaga ama sharcigaaga shaqada ama codsiga gargaarka dawladda (welfare benefits) inkasta oo aan taas la hubin.

Oraalo kale oo tarjuman ayaa laga heli karaa <http://languages.refugeecouncil.org.uk>

Asylum Support Partnership is a partnership project hosted by the British Refugee Council  
British Refugee Council, (commonly called the Refugee Council) is a company limited by guarantee registered in England and Wales, [No 2727514] and a registered charity, [No 1014576].  
Registered office: 240-250 Ferndale Road, London SW9 8BB, United Kingdom, VAT reg no: 936 519 988



Waxa suurogal ah in UKBA ay dib u fiiriso kiiskaaga ama arrintaada ka hor inta aanay dhamaan mudada shanta sannadood oo ay go'aan ku gaadho in aanad u sii baahnayn badbaadin dheeraad ah oo aad ku sii joogtid Boqortooyada Midowday (UK). Taasi waxay dhici kartaa haddii xaaladaha ka jira wadankaagii ay si weyn u soo fiicnaadeen (oo ay dawladda UK arrintaas ka soo saartay ogeysiis) ama iyada oo sababtu tahay falalkaaga oo ka soo horjeeda qodobada Heshiiska Qaxootiga. Waxa aad xaq u yeelaan doontaa racfaan ama ambiil aad ka qaatid go'aankaas.

Marka UKBA go'aan ku gaadho in aanad u sii baahnayn badbaadin, waxay ku siin kartaa badbaadin bini'aadan (humanitarian protection) ama oggalaansho ku-meel-gaadhsiis ah (discretionary leave) ama waxay go'aan ku gaadhi kartaa inaad ka baxdid wadanka.

Haddii ninkaaga ama xaaskaaga, iyo caruurtaada ka yar 18 sannadood ay kula soo galeen Boqortooyada Midowday (UK), waxa iyagana la siin doonaa isla oggalaanshaha adiga lagu siiyay. Haddii ninkaaga ama xaaskaaga, iyo caruurtaada ka yar 18 sannadood aanay kula joogin Boqortooyada Midowday (UK), waxa aad codsan kartaa inay kuu yimaadaan.

Haddii aad doonaysid inaad u safartid wadamo kale waa inaad UKBA ka codsatid dukumentiga safarka ee Heshiiska Qaxootiga (Refugee Convention travel document). Waxa aad dukumentigaaga safarka ku tagi kartaa wadan kasta marka laga reebo ka aad ka baqayso in lagugu cadaadiyo.

## Ma lagu siiyay oggalaansho badbaadin bini'aadan?

Haddii aan lagu sii oggalaansho qaxooti, waxa dhici karta in UKBA ku siiso oggalaansho badbaadin bini'aadan. Oggalaanshahaas waxa la bixiyaa marka UKBA ictiraafto in aanay ammaan kuu ahayn inaad ku noqotid wadankaagii laakiin aanad ka soo baxaynin qodobada oggalaansho qaxooti. Waxa kale oo jirta in oggalaanshaha badbaadin bini'aadan loo bixiyo sababo aan ahayn magangalyo.

Oggalaanshaha Badbaadinta Bini'aadan waxa la bixiyaa mudo ah shan sannadood. Haddii ninkaaga ama xaaskaaga, iyo caruurtaada ka yar 18 sannadood aanay kula joogin Boqortooyada Midowday (UK), waxay UKBA u oggalaan doontaa inay kuu yimaadaan haddii aad codsatid inay kuu yimaadaan.

Waxa si weyn muhiim u ah inaad codsatid in lagu kordhiyo oggalaanshahaaga joogitaanka ee shan sannadood ka hor inta aanuu kaa dhicin. Marka ay dhamaato mudada shanta sannadood ah, haddii aad codsi sameysatid waa in UKBA kuu oggalaato inaad si aan xad lahayn u sii joogtid Boqortooyada Midowday (UK) haddii ay ka soo qaadaan inaad wali u baahan tahay badbaadin. Haddii UKBA go'aan ku gaadho in aad wali u baahan tahay badbaadin, waa inay kuu oggalato inaad wadanka si aan xad lahayn u sii joogtid iyada oo shuruuddu tahay inaad ku gudubtid Imtixaanka Noloshu UK. Haddii UKBA go'aan ku gaadho in aanad u sii baahnayn badbaadin waxa laga yaabaa inaad xaq u leedahay racfaan ama ambiil aad ka qaadatid go'aankaas laakiin wakhtigii la diyaarinayay qoraalkan taasi ma cadeyn.

Waxa suurogal ah in Hay'adda Xuduudka ee UK (UK Border Agency) ay dib u fiiriso kiiskaaga ama arrintaada ka hor inta aanay dhamaan mudada shanta sannadood oo ay go'aan ku gaadho in aanad u sii baahnayn badbaadin dheeraad ah. Taasi waxay dhici kartaa haddii xaaladaha ka jira wadankaagii ay si weyn u soo fiicnaadeen (oo ay dawladda UK arrintaas ka soo saartay ogeysiis) ama iyada oo sababtu tahay falal ka soo horjeeda qodobada Heshiiska Qaxootiga oo aad ku kacday. Waxa aanu fahamsan nahay in dawladdu rabto inay xaq racfaan ka bixiso go'aamadaas laakiin wakhtigii la diyaarinayay qoraalkan taasi ma cadeyn. Haddii UKBA ay go'aan ku gaadho in aanad u sii baahnayn badbaadin bini'aadan, waxa dhici karta inay ku siiso oggalaansho kale oo la yidhaahdo oggalaansho ku-meel-gaadhsiis ah (discretionary leave) ama ay go'aan ku gaadho inaad ka baxdid wadanka.

Haddii aad rabtid inaad u dhooftid wadamo kale waxa lagaa filayaa inaad isticmaashid baasaboorka wadankaagii hooyo. Haddii aanad haysan baasaboorka, waxa aad UKBA weydiisan kartaa dukumentiga safar oo la yidhaahdo Cadeynta Safarka (Certificate of Travel). Fadlan la soco inay jiraan tiro wadamo ah oo aan u haysan in dukumentigaasi yahay dukumentiga safar oo sax ah. U hubso in taasi

jirto adiga oo weydiinaya safaaradda wadanka aad ku talo-jirtid inaad booqatid ka hor intaanad codsan dukumentiga Cadeynta Safarka.

## Ma lagu siiyay oggalaansho joogitaan oo ku-meel-gaadhsiis ah?

Haddii aanad helin oggalaansha qaxootiga ama oggalaansho badbaadin bini'aadan, Hay'adda Xuduudka ee UK (UK Border Agency) waxay ku siin kartaa oggalaansho joogitaan oo ku-meel-gaadhsiis ah, kaasoo caadi ahaan loo bixiyo sababo aan ahayn magangalyo. Oggalaanshaha mudadiisu waa saddex sannadood ama wax ka yar.

Marka la gaadho dhamaadka saddexda sannadood ee oggalaanshaha joogitaanka ku-meel-gaadhsiiska ah isla markaana aad codsatid kordhin, UKBA waxay dib u fiirin doontaa arrintaada. Haddii xaaladahaagu yihiin kuwo wax laguugu oggalaan karo, UKBA waxay kuu kordhin kartaa oggalaanshaha joogitaanka ku-meel-gaadhsiiska ah mudo ah saddex sannadood oo kale. Marka ay kuu dhamaato lix sannadood oo ah oggalaansho joogitaan ku-meel-gaadhsiis ah, waa in UKBA ay kuu oggalaato inaad UK u sii joogtid si aan xad lahayn iyada oo shuruuddu tahay inaad ku gudubtid Imtixaanka Nollosha UK.

UKBA waxay badanaa oggalaan doontaa in ninkaaga ama xaaskaaga iyo caruurtaada ka yar 18 sannadood kuu yimaadaan ka dib marka lagu siiyo oggalaanshaha joogitaan ee aan xad lahayn. Haddii aad goor hore codsatid, qoyskaagu waxa uu kuu iman karaa kaliya haddii UKBA u maleyso inay jiraan xaalado kalifaad leh ama u baahan naxariis oo ku haysta. Marka aad codsatid in qoyskaagu kuu yimaado, waxa lagaa rabaa inaad muujisid inaad hoy u haysid isla markaana aad dhaqaale ahaan taageeri kartid.

Haddii aad rabtid inaad u safartid wadamo kale waxa lagaa filayaa inaad isticmaashid baasaboorka wadankaagii hooyo. Haddii aanad haysan baasaboorka, waxa suurogal ah inaad UKBA ka heshid dukumentiga safar oo la yidhaahdo Cadeynta Safarka (Certificate of Travel). Marka aad UKBA weydiisanaysid dukumentiga safar, waxa lagaa rabi doonaa inaad cadeysid in maamulka wadankaagii hooyo si aan caqli-gal ahayn kuugu diideen baasaboorka. Fadlan la soco inay jiraan tiro wadamo ah oo aan u haysan in dukumentiga UKBA yahay dukumentiga safar oo sax ah. U hubso in taasi jirto adiga oo weydiinaya safaaradda wadanka aad ku talo-jirtid inaad booqatid ka hor intaanad codsan dukumentiga Cadeynta Safarka.

## Maxay yihiin xuquuqda kale ee aan leeyahay?

Haddii aad haysatid oggalaansho qaxooti, badbaadin bini'aadan ama oggalaansho joogitaan ku-meel-gaadhsiis ah, waxa aad leedahay guud ahaan isla xuquuqda iyo xaqa adeegyo ee ay leeyihiin dhamaan daganeyaasha kale iyo muwaadiniinta Boqortooyada Midowday (UK).

### Ma shaqeyn karaa?

Oggalaanshaaga shaqada waxa uu la socdaa warqadda aad ka heshid hay'adda xuduudka ee UK. Waa inaad la xidhiidhid xafiiska shaqada ee degmadaada (Jobcentre Plus). Xafiisyadaasi meesha ay ku yaaliin waxa aad ka heli kartaa laybareeriga degmada, buugga teleefonada ama <http://www.dwp.gov.uk> Si aad u heshid war dheeraad ah oo ku saabsan xuquuqdaada shaqo iyo ikhtiyaarada kuu banaan marka aad doonaysid tababar, akhri Tilmaan-bixiyaha qaxootiga xagga tababarka iyo shaqada (*Refugees' guide to training and employment*) oo laga helo <http://languages.refugeecouncil.org.uk> Haddii aad joogtid iskotlaan, akhri Helidda Shaqo: Tilmaan-bixiyaha Qaxootiga Iskotlaan (*Finding Work: A Guide for refugees in Scotland*) oo laga helo: [http://www.scottishrefugeecouncil.org.uk/Employment\\_Toolkit](http://www.scottishrefugeecouncil.org.uk/Employment_Toolkit)

### Ma isticmaali karaa adeegyada caafimaadka?

Waxa aad xaq u leedahay daryeel caafimaad oo bilaash ah oo uu bixiyo Adeegga Caafimaadka Qaranka (National Health Service). Waxa taa ku jira daweynta degdegga ah iyo daweynta caadiga ah,

dawooyinka dhakhtarku soo qoro qaar ka mid ah, adeegyada caafimaadka caruurta iyo umusha, qorsheynta qoyska, daweynta ilkaha, baadhitaanada indhaha iyo muraayadaha indhaha.

### **Ma codsan karaa faa'iidooyinka gargaarka (welfare benefits)?**

Haddii aanad diyaar u ahayn inaad raadsatid shaqo, isla markaana aad dakhligaagu ama dhaqaalahaagu si weyn u yar yahay ama aanad waxba haysan, waxa aad codsan kartaa faa'iidooyinka gargaarka (welfare benefits), kaasoo marna loo yaqaano faa'iidooyinka sugidda bulshada (social security benefits). Si aad u codsatid, waa inaad la xidhiidhid xarunta shaqada degmadaada (Jobcentre Plus). Xafiisyadaasi meesha ay ku yaaliin waxa aad ka heli kartaa laybareeriga degmada, buugga teleefonada ama <http://www.dwp.gov.uk> Waxa aad war dheeraad ah oo ku saabsan gargaarka dhaqaale (welfare) ka heli kartaa Tilmaan-bixiyaha qaxootiga xagga gargaarka dhaqaale (*Refugees' guide to welfare benefits*) oo laga helo <http://languages.refugeecouncil.org.uk>

### **Halkee baan ka heli karaa meel aan u hoydo?**

Haddii aad ku jirtid hoy ay bixisay UKBA, waa inaad ka baxdid oo aad raadsatid hoy, marka UKBA ku siiso go'aan aqbalaad ah. Waa inaad ku guurtid 28 maalmood gudahood. Waa inaad la xidhiidhid maamulka degmadaada ama xafiis gargaar guri si looga hadlo ikhtiyaarada kuu banaan. Haddii aanad helin meel aad u hoyatid ama mustaqbalka dhow aad noqon doontid bilaa hoy, waxa kale oo wici kartaa khadka gargaarka gaboodka (Shelter) oo ah 0808 800 4444.

Marka aad hoy heshid, waa inaad bixisid kiro ama codsatid gargaar hoy (housing benefit). Haddii aad la joogtid saaxiibo ama qaraabo, isla markaana aad doonaysid inaad la sii joogtid, waad yeelli kartaa sidaas, laakiin waa inaad hay'ad la-talin kala tashatid sida taasi u saameyn doonto xuquuqdaada gargaarka (welfare) iyo gargaarka hoyga (housing benefits). Waxa aad war dheeraad ah ka heli kartaa Tilmaan-bixiyaha qaxootiga xagga hoyga (*Refugees' guide to housing*) oo laga helo <http://languages.refugeecouncil.org.uk>

Iskotland waxay leedahay xeerar hoy oo u gaar ah. Haddii aad ku nooshahay Iskotland ama aad rabtid inaad u guurtid, fadlan la xidhiidh Golaha Qaxootiga ee Iskotland (Scottish Refugee Council) oo teleefonkoodu yahay 0800 085 6087 ama booqo <http://www.scottishrefugeecouncil.org.uk>

### **Ma hagaajin karaa waxbarashadayda ama ma heli karaa tababar farsamo?**

Waxa jira duruus badan iyo meelo badan oo aad wax ka baran kartid. Waxa caadi ahaan kuwaa mas'uul ka ah maamulka waxbarashada degmada ee goobta waxbarashada lagu bixinayo. Laybareeriga degmadaada ama rugta internetka ee maamulka degmada ayaa haya faahfaahinta goobaha waxbarasho ee kala duwan ee aagaaga.

Waxa aad war dheeraad ah oo ku saabsan ikhtiyaarada tababarka ee kuu banaan ka heli kartaa Tilmaan-bixiyaha qaxootiga xagga tababarka iyo shaqada (*Refugees' guide to training and employment*) oo laga helo <http://languages.refugeecouncil.org.uk>

### **War kale**

Waxa dhici karta inaad u baahan tahay gargaar iyo la-talin ku saabsan sida loo isticmaalo adeegyada kor lagu sheegay. Hay'adaha sida Xafiiska La-talinta Muwaadiniinta (Citizens Advice Bureaux) ayaa bixin kara la-talin iyo war ku saabsan mawduuc kasta. Hay'ado badan ayaa soo diyaarin kara turjubaan haddii aad u baahan tahay turjubaan. Waxa dhicii karta in degmadaada ay ka jirto hay'ad beeled oo gargaar iyo taageero siisa qaxootiga wadankaaga. Si aad faahfaahin dheeraad ah u heshid, booqo laybareeriga degmada, eeg buugga teleefoonada ama soo eeg rugta internetka ee maamulka degmadaada. Waxa dhici karta in One Stop Service (Adeegga Hal Meel) ee degmadaadu ku siin karo faahfaahinta la-xidhiidhista hay'adaha degmada ee bixiya la-talin.

### **Dokumentiyadaada**

Marka aad codsatid adeegyo waxa dhici kara in lagaa rabo inaad tustid warqadda kaaga timi UKBA ee ku siinaysa oggalaanshaha joogitaanka. Waxa kale oo dhici kara in lagaa rabo inaad tustid

warqadda ka timi UKBA ee la yidhaahdo NASS 35 ee sheegaysa inay joojiyeen taageeradii ay ku siin jireen.

### **Marka aad sugaysid kordhinta oggalaanshaha joogitaanka**

Marka aad sugaysid in UKBA go'aan ka gaadho in lagu kordhiyo oggalaanshaha joogitaanka, waxa aad leedahay isla xuquuqda adeegyada ee aad lahayd ka hor intaanad codsan kordhinta, in alaale inta aad sameysay codsiga ka hor intaan oggalaanshaha joogitaanku kaa dhicin.

### **Raacdeynta xubnaha qoyska**

Haddii u lumay xidhiidhkii aad lahayd qoyskaaga dibadda jira, waxa dhici karta in Laanqeyrta Cas (Red Cross) kaa caawiso sidii aad u heli lahayd. Wixii ah faahfaahinta laanta degmadaada ee Laanqeyrta cas, soo eeg [www.redcross.org.uk](http://www.redcross.org.uk)

### **Imtixaanka Noloshu UK**

Haddii aad codsanaysid oggalaanshaha joogitaanka aan xad lahayn (indefinite leave to remain) ama dejin (settlement), waxa lagaa rabi doonaa inaad muujisid inaad taqaanid noloshu ka jirta UK. Waxa aad taas sameyn kartaa adiga oo gala Imtixaanka Noloshu UK ama adiga oo gala waxbarashada Ingiriisiga Luqad Labaad Ahaan iyo muwaadinnimada. Wixii war dheeraad ah ka eeg <http://www.lifeintheuktest.gov.uk>

### **Adeegga La-qabsiga iyo Shaqada ee Qaxootiga (Refugee Integration and Employment Service)**

Haddii oggalaansho qaxooti ama oggalaansho badbaadin bini'aadan lagu siiyay ka dib 1-da Bishii Tobnaad 2008 waxa dhici karta inaad xaq u leedahay adeeg ay bixiyaan hay'adaha qaxootiga oo loogu talagalay inuu kaa gargaaro inaad si hufan ula qabsatid noloshu UK. La xidhiidh qaabiilsanaha arrintaada ee UKBA ama hay'ad qaxooti oo degmadaada ah si aad u habsatid inaad xaq u leedahay. Faahfaahinta sida loola xidhiidho hay'adaha qaxootiga waxa laga helaa <http://languages.refugeecouncil.org.uk/english/services.htm>

***Warka ku yaala qoraalkan yar ma aha sharaaxaad buuxda oo ku saabsan sharciga balse waa tilmaan-bixin kaliya. Fadlan wixii ah talo faahfaahsan u raadso la-talin sharci. Wixii war dheeraad ah ee ku saabsan sida loo helo wakiil sharci ka eeg qoraalka la yidhaahdo Codsashada magangalyo (Applying for asylum) oo laga helo <http://languages.refugeecouncil.org.uk>***

Asylum Support Partnership consists of:

North of England Refugee Service, charity number: 1091200 [www.refugee.org.uk](http://www.refugee.org.uk)  
Refugee Action, charity number: 283660 [www.refugee-action.org.uk](http://www.refugee-action.org.uk)  
Refugee Council, charity number: 1014576 [www.refugeecouncil.org.uk](http://www.refugeecouncil.org.uk)  
Scottish Refugee Council, charity number: SC008639 [www.scottishrefugeecouncil.org.uk](http://www.scottishrefugeecouncil.org.uk)  
Welsh Refugee Council, charity number: 1102449 [www.welshrefugeecouncil.org](http://www.welshrefugeecouncil.org)